**Sharciga 27 Disembar 1970, lamba. 76.**

**Xeeka Farmashiyeyaasha**

**GUDDOOMIYAHA**

**KOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu Dhagaystay Talada Wasiirka Caafimaadka;
Marka uu helay oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka.

**WUXUU MEELMARINAYAA**

Xeerka soo socda:

## Cutubka 1aad

Amarro Guud

### Qaybta 1aad

Layliska ilaalinta farmashiyaha

#### Qod. 1

Xirfadda farmashiyanimada waxay hoos imaanaysaa ilbaadinta Wasaaradda Caafimaadka.

### Qaybta 2aad

Milkiyadda farmashiyaha

#### Qod. 2

1. Farmshiyeyaasha waxaa yeelan kara iskaashato farmashiyeed oo leh Agaasime Farsamo, haystana shahaado farmashiye;
2. Marka laga soo tago Xeerka iskaashatooyinka ee iskaashatooyinkii horay u jiray si waafaqsa xeerkaan waxay ka koobnaan doonaan ugu yaraan saddex qof oo aan ka koobnayn isla qoyska.

#### Qod. 3
**Oggolaashaha**

1. Oggolaasha lagu furayo iyo loo adegsanayo farmashiye waxaa bixinaya Wasaaradda Cafimaadka iyado loo hoggaansamayo Xeerkaan;
2. Oggolaashaha ku xusan faqradda sare wuxuu noqon karaa keliya:
   a) iskaashato ku guulaysatay keliya tartan;
   b) Maamulka maxalliga, isagoo xurmaynaya xeerkaan waxay abyuuri karaa hal farmashiye iyo ka badan intii ku siman xad dhuleedkooda;
3. oggolaashaha ku xusan qod. 3 waxaa lagu bixin karaa shuruudo ah:
   a) in ay jirto xarun bannaan marka la eego qaabaynta magaalada meesha laga oggolaanayo farmashiyaha la furayo iyo adegsiga farmashiyaha;
   b) in aanay iskaashatooyinka farmashiyeyaasha ka dhex jirin farmashistayaal gooniya qaar doonaya in ay u soo wareejiyaan farmashiyahooda xaruntaas.

**Qod. 4**
**Wareejin la'aanta Oggolaashaha**

Oggolaashaha ku xusan qodobka sare looma wareejin karo cid saddexad.

**Cutubka 2aad**
Tartanka

**Qod. 5**
**Ka-qaybgalka Dadweynaha**

1. Wasaaradda Caafimaadka, haddii loo baahdo marka la eego qaabaynta qorshaha Magaala kasta waxay soo bandhigi kartaa tartan dadweynaha u furan mid ama wax ka badan jagooyin farmashiiste;
2. Wasaaradda Caafimaadka qaraarada ay ku soo bandhigayso tartanka waaa in ay ku sheegtaa:
   a) Tirada jagooyinka bannaan; magalada iyo goobta bannaan;
   b) magaalada iyo xarunta ay ka bannaanyihiin; taariikhda;
   c) taariikhda iyo goobta lagu qabanayo tartanka;
   d) shuruudaha cayiman ee tartanka looga qaybgalayo iyadoo fiiro gaara loo yeelanayo amarrada ku xusan faqradda labaad ee xagga sare.
3. Tartanka waxaa lagu faafinayaa warbaahinta maxalliga ugu yaraan laba bilood taariikhda tartanka ka hor.

**Qod. 6**
**Oggolaasha ka-qaybgalka**

Waxaa loo oggolyahay in ay ka qabgalaan iskaashatooyinka leh shuruudaha ku xusan dekereetada lagu soo bandhigay tartanka.

**Qod. 7**
**Guddiga Garsoorka**

1. Guddiga Garsoorka wuxuu ka koobanyahay:

   a) Dhaqtarka Gobolka, haddii la waayo ama ay jiraan wax ka reebaya dhaqtar ay soo magacowdo Wasaaradda Caafimaadka, kaaso noqonaya guddoomiyaha guddiga;
   b) sharciyaqaan haysta shahaadada qawaaniinta oo laga soo magacaabo Wasaaradda Caafimadka;
   c) laba farmasiite oo laga magacaabo Wasaaradda caafimaadka;
   d) sarkaal ka tirsan Wasaarada Caafimaadka oo qabanaya xilka Xoghaynta guddiga.

**Qod. 8**
**Shuruudaha**

Ka sokow wixii shuruudo laga doonayo qaraarada tartanka lagu soo bandhigay, ka qaybgalayaashu waa in ay leeyihiin shuruudaha soo socda:

a) Dadka ay ka koobanyihiin iskashatada waa in ay yihiin Muwaadiniin Soomaaliya. Wixii la xariira muwadininta shisheeyaha waa in ay yihiin dad anshax wanaagsan oo

deggan Dalka Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya muddo aan ka yareyn toban sano;

b) qoraalka lagu dhisay iskaashatada in laga soo diiwaangaliyay Maxkamadda Gobolka;

c) caddeeyo in uu haysto qalab farsamo oo uu ku filan socodsiint farmashiyaha.

**Qod. 9**
**Qaababka Qiimaynta**

1. Guddiga Garsoorka marka uu kala xulanayo tartamayaasha waa in u tixgaliyaa shuruudaha qiimaynta soo socda:
   a) in uu leeyahay qaddarin hore ee xagga farmashayanimada;
   b) in uu wax ka dhisay iskaashato mid ama ay shuraako badan oo uu ku soo maareeyay farmashiye hore dariiq la codsaday;
   c) codsiyada kala duwan ee isla waddadaa waxaa tixgalin weyn la siinayaa:
      1. xil-waayeelnimada loo leeyahay wax qabadka isla waddadaas;
      2. Kooxo is-raacsan ee ka hawlgala isla waddada hal iskaashato.
   d) haddii ay isla ekaadan dhammaan shuruudaha jidwaddadaa waa loo qorituurayaa.
2. Guddiga Garsoorka waxy siinayaan tixgalin qaabka darajaynta tartamayaasha la soo sheegay;
3. Haddiiba dariiq u bannaanaado makaalada oo aanay qaar kale aanay soo codsan, waddadaas waxaa la galinaya tartan madax bannaan.

**Cutubka 3aad**
Bixinta Shatiga Furasha Farmashiyaha

**Qod. 10**
**Shatiga**

Duqa Magaalada, marka uu uu hubiyo saxnaanta qofka ku guuulaystay si waafaqsa xeerkaan iyo gudashada qaababaka iyo waajibaadka kale ee canshuuraha ee arrimaha xeerku sheegayo, wuxuu bixinayaa shatiga lagu furayo laguna hawlgalayo farmashiyaha.

**Qod. 11**
**Dhicitaanka Oggolaashaha**

1. Dhicitaanka oggolaashaha lagu hawlgalayo wuxuu dhacayaa:
   a) marka la caddeeyo in uu musalifay qofkii loo oggolaaday;
   b) markii uu ka maarmo oggolaashaha;
   c) markii la xiro farmashiyaha muddo ku siman shan iyo toban cisho iyadoo aan la soo wargalin masuuliinta caafimaadka ee goobta iyo isla masuulintaas aanay u oggolaan marka uu soo wargaliyay;

d) markii Maamulaha Farsamada u ka soo gudbiyo falal lagu eedaynayo qofka ka hawlgalaya (haddiba ay jirto) oo ayna ka dhalato dhibaato culus ee xagga ammaanka shaqsiga ama caafimaadka dadweynaha;
e) marka uu dhinto qofka la oggolaaday.

Dhicitaaanka wuxuu ku soo baxayaa Dekereeto uu soo saaro Wasiirka Caafimaadka.

2. Guddoomiyaha Farmashiyaha waa in uu wargaliyaa Wasaaradda Caafimaadka tallaaba kasta oo ku saabsan hakinta hawlgalka xirfadda farmashiyaha.

**Qod. 12**
**Codsiga**

Qofka ku guulaysta soddon cisho gudahood, dhicitaanka ka dib, waa in uu waydiista masuuliinta ku shaqada leh shatiga lagu furayo iyo lagu hawlgalayo farmashiyaha. Codsiga waa in uu wehliyaa magaca buuxa ee Maamulaha Farsamad iyo kan ka hawlgalaya, taariikhda iyo goobta uu ku dhashay, lambarka iyo taariikhda qoraalka lagu dhisay haddii ay iskaashato tahay.

**Qod. 13**
**Jaan Qaadis la'aanta**

Ganacsiga jumlada iyo kuwa tafaariiqda daawooyinka waa kuwo aan isla jaan qaadi Karin.

**Qod. 14**
**Kormeerka**

Ka hor inta aan la bixin shatiga Dhaqtarka Gobolka wuxuu soo eegayaa iyo kormeerayaa goobta isagoo hubinaya haddii la haysto shuruudaha farmashiyaha looga hawlgalayo.

**Cutubka 4aad**
Waajibaadka kan Hawsha Qabanaya

**Qod. 15**
**Bixinta**

Hawl-fuliyaha waa in uu farmashiyaha ku qalabeeya agabka, qalabka iyo daawooyinka looga baahanyahay socodsiinta farmashiyaha dhex-dhexaadka ah.

**Qod. 16**
**Sumaha**

1. Marka Maamulayaasha Farsamada ama hawlwadeenada ay keenaan sumo ka dib marka uu amro dhaqtar qalliinka ama dhaqtar xoolaha nool waa in qabtaa oo ku meeshooda ku kaydiyaan asalka warqadda dhaqtarka isagoo qoraya magaca qof loo diray nuqulna la siinayo isla markaasna la siinayo nuqul kan soo weydiistay. Marka warqadda dhaqtarka qoray ay ku jiraan shayo sumo ah, xitaa dhibco yar-yar, kuwaan dambe waa in lagu tilmaama warqadda;
2. Haddi farmashiistaha marka uu ku bixinayo sumaha amar dhaqtar qalliin ama midka xannaanada xoolaha uu ka ogaado warqadda dhaqtarka daawo sun ah ama dhibco oo caafimaad ahaan aan ku habboonayn waa in uu isla warqadda dhaqtarka ama kan

xannaanda xoolaha, ku caddeeyaa in daawaynta ay isaga masuuliyaddiisa saarantahay uun isticmaalkeeda bixinayo.

**Qod. 17**
**Farmashiyaha**

Maamulaha Farsamada ama midka hawlwadeenka farmashiyaha waa in uu haystaa nuqul ah Taxalka daawooyinka Caalamiga ee dalkeena laga isticmaalo inta laga samaynayo mid qaran.

**Qod. 18**
**Iibka**

1. Kuwa daawooyinka sameeya iyo jumlaystayaasha ma iibin ka karaan daawooyinka sida joogtada farmashiyeyaasha loogu oggolaaday sida ku salaysan xeerkaan;
2. Maamulaha Farsamada ama mid hawlwadeen ah ma diidi karaan in iibiyaan daawooyinka ay hayaan ama socodsiiyaan warqad dhaqtar soo saxiixay oo ka mida daawooyinka farmashiyaha yaalla;
3. Waxaa mamnuuca qaab kasta ka ganacsiga daawooyinka sambalada.

**Qod. 19**
**Masuuliyadda**

1. Maamulaha Farsamada ayaa ka masuula habsami u socodka hawlaha farmashiya iyo u hoggaansanaanta xeerarka caafimaadka sidoo kale wixii waajibaad farsamo iyo aqoon cilmiyaysan oo xeerkaanu sheegayo;
2. Isagu wuxuu la wadaagi karaa ama isku baddali karaa haddii la waayo ama uu maqanyahay ama ay jiraan wax ka reebaya farmashiiste kale oo diboloomo haysta muddo aan ka badnayn 60 cisho;
3. Haddiiba ay jirto baahi Maamulaha Farsamada waxaa baddali karaa farmashiste kale oo jaamaci ah muddo aan ka badnayn lix bilood;
4. Baddalka lagu soo sheegay faqradda sare waxaa la wargeliyaa Sarkaalka Caafimadka magaalada uu ku yaallo farmashiyuhu.

**Qod. 20**
**Saacadaha Shaqada**

1. Sacadaha furidda iyo xiridda farmashiyaha waxaa lagu caddaynayaa amar ka soo fula Duqa Magaalada isagoo raacaya talada Sarkaalka Caafimadka iyo dhaqtarka Gobolka;
2. Farmashiyeyaasha habeenkii shaqada leh waa in maalin kasta dadweynaha loogu sheegaa qaab habboon ee warbaahinta Magaalada.

**Qod. 21**
**Hakinta**

1. Duqa Magaalada, marka u helo tala soo jeedinta Sarkaalka Caafimaadka iyo Dhaqtarka Gobolka wuxuu qaraar sababaysan ku hakin karaa shatiga shaqada farmashiyaha muddo aan ka badnayn hal bil;
2. Qararaarka ku xusan faqradda sare waxaa looga caban karaa Wasaaradda Caafimaadka taaso qaraar kama dambaysa ku go’aaminaysa.

**Qod. 22**
**Ka Noqoshada Shatiga**

Wasiirka Caafimaadka, marka uu dhagaysto Dhaqtarka Gobolka iyo Sarkaalka Caafimaadka wuxuu la noqon karaa shatiga farmashiyaha sababa soo socda awgood:

1) — caadaysiga u hoggaansan la'aanta xeerkaan;
2) — caadaysiga diidmada shaqada habeenimo;
3) — soo noq-noqosha iibinta sumaha reeban ama maandooriye kale kuwaasoo iibkoodu sharcigu aanu oggolayn;
4) — sababa la xariira qod. 12 ee xeerkaan.

**Cutubka 5aad**
Qiimahajumlada iyo Tafaariiqda Daawooyinka iyo Shayada Raacsan

**Qod. 23**
**Qimaha Jumlada iyo Tafaariiqda**

Qiimaha jumlada iyo tafaariiqda daawooyinka iyo shayada kale ee raacsan Wasiirka Caafimaadka ayaa sanad kasta dekereeto ku soo goynaya iyadoo Wasaaradda Ganacsiga iyo Wasaaradda Horumarinta Miyiga iyo Xannaanada Xoolaha ay ku soo waafaqayaan.

**Qod. 24**
**Kharashka Gaadiidka**

Wasaaradda Caafimaadka marka ay gonayso qiimaha lagu soo sheegay qodobka sare waxay eegaysaa Magaala iyo tuuloo kasta kharashka gaadiidka.

**Cutubka 6aad**
**Qorshaha Qaabaynta**

**Qod. 25**
**Qorshaha Qaabaynya Caasimadda**

Qoorsha qaabaynta caasimadda waxaa sanad kasta lagu oggolaanayaa dekereeto Wasaaradda Caafimaadka ka dib marka uu dhagaysta Golaha Sare Caafimaadka.

**Qod. 26**
**Qorshaha Qaabaynta Magaalooyinka kale**

Qorshaha qaabaynta Magaalooyinka kale marka laga reebo caasimadda waxaa lagu oggolaanayaa dekereeto Wasiirka Caafimaadka oo ay la socoto soo jeedinta Dhaqtarka Gobolka ama Sarkaalka Caafimaadka.

**Qod. 27**
**Dib u-eegista Qorshaha**

Qorshaha qaabaynta magaala kasta waxaa lagu samayn karaa dib u-eegis sanad kasta isla qaabkii lagu oggolaaday qorshaha isaga.

**Qod. 28**
**Kala Fogaanshaha Farmashiyeyaasha**

Tirada oggolaashaha waxaa lagu jaan goynayaa si aan farmashiyeyaal badan uga jirisin 10.000 deggaanka.

Marka ay jiraan baahiyo gaara ee gargaar farmashiye maxalliya, xitaa marka loo eego khariiradaha iyo suurtgalnimada in wax lagu kordhiyo ama wax laga baddalo qaabka dadka, waxaa la samayn karaa xad kala fogaansho iyadoo farmashiye kasta oo cusub uu u jirsado kan kale ugu yaraan shanboqol mitir.

**Cutubka 7aad**
Xeerarka Ciqaabeed

**Qod. 29**

Cid kasta oo ku xdgudubta xeerkaan; waxaa lagu ciqaabayaa haddii falku aanu keenayn dambi ka culus saddex bilood illaa saddex sano ama ganaax ah 300 illaa 5.000 sh. ama iyago wada jira.

**Cutubka 8aad**
Xeerarka Kalaguurka

**Qod. 30**
**Qorshaha Qaabaynta**

Qorsha qaabaynta ku xusan Cutubka VII waa in la meelmariyaa sanad gudahiis marka xeerkaanu dhaqangalo.

**Qod. 31**
**Dhismaha Iskaashtooyinka uu Xeerkaanu Sheegayo**

1. Wasaaradda Caafimaad sanad gudahiis marka uu xeerkaanu dhaqangalo waxay dib ugu abaabulaysaa iskaashatooyinka farmashiyeyaasha hadda ka jira caasimadda;
2. Wixii ku saabsan Magaalooyinka kale Wasiirka Caafimadka isagoo maanka ku haya caafimaadka guud, mugga kuwa shaqada haya iyo helitaanka farmashiistayaal jaamaciya wuxuu qaadayaa tallaabooyinka loo baahanyahay si loo gaarsiiyo farmashiyeyaasha caasimad ka baxsan heerka caasimadda;

**Qod. 32**
**Wax ka Baddalidda**

Muddada ku siman saddex sano marku u xeerkaanu dhaqangalo Wasiirka Caafimadka haddii la caddeeyo dhibaatooyin aan laga gudbi karin oo leh dabeecad tijaabo-farsamo ama mid cilmiya wuxuu ka cafi karaa mid iyo ka badan farmashiyeyaal waajibaadka xeerkaan ku qoran.

**Cutubka 9aad**
Xeerarka Gunaanadka

**Qod. 33**
**Dhaqngalka Xeerka**

Xeerkaanu wuxuu dhaqangalayaa 1 Janaayo 1971 waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya sidoo kale waxaa lagu biirinayaa Uruurinta Rasmiga ee xeerarka iyo Dekereetooyinka.

Muqdisho, 27 Disembar 1970.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
**S.Gaas Maxamed Siyaad Barre**

Wasiirka
Caafimaadka
**Dr. Maxamed Aadan**